## DALMAR: Taariikh Nololeedkii Ibraahin Ismaaciil

## CUTUBKA 2aad

## Barbaarid: Cadan iyo Laxij

**Sebtember 29, 2013**

Afar ilaa shan beri dabadood ayaannu Cadan gaarnay. Halkaa ayaa sidii aan filayay carruuro badan oo filkay ah ka helay. Hase ahaatee, uma bogin markii aan ku baraaruggay in cunnada iyo waxyaalaha kale ee wanwanaagsani aanay bilaash ahayn, sidii aan filayay. Waxyaalo badan oo aanan hore u arag ayaan halkaa ugu tegay. Dadku guryo safaf ah oo dhagax iyo sibir ka dhisan ayay ku noolyihiin. Badankood guryuhu waxa ay ka koobanyihiin hal qol oo saqaf fidsan iyo ardaa dambe leh. Waxaan arkay fardo wax la yaab leh oo muddo igu qaatay in aan fahmo waxa loola dan leeyahay daba jiitamayaan [gaari faras]. Mar dambe ayay ii baxday in gaarigu aanu sida faraska noolayn. Safarradu intaa si is daba joog ah ayay isaga soo daba dhacayeen oo alaabo badan oo aanan hore u aqoon keenayeen. Markii aan waxyaalahaa wanwanaagsan la qabsaday ayaan nolosha Cadmeed jeclaaday. Muddo aan sidaa u dheerayn ka dib, ayaan iyana ogaaday in sida kaliya ee aan wax aan cuno ku heli karaa ay tahay xatooyo xirfadaysan.


Baahida, ayaa na bartay khayaanooyin aannu ku helno qaddaadiicda aan nolol-maalmeedkayaga ku maaraynno. Inta qarsho jabsanno, ayaannu mararka qaarkood dekedda warwareegnaa oo jawaan docda jeexnaa si aan xabbado basal iyo wax la mid ah uga daadsanno, dabadeedna gambo ama laba ku iibinnaa, wax uun aannu gaajada isaga yuraynno. Ama inta maqaaxi soo ag marno, ayaannu jeedaashannaa gambo qof macmiil ah oo jalmad qaxwe ah iibsaday uu miiska saaray. Qalab gooni ah oo aannu qadaadiicdaa ku soo dabanno ayaan u samaysannay. Ul ayay ahayd timiri afka kaga nabantahay. Annaga oo og in diinta Hinduu-gu ay ka mamnuucayso in uu taabto xoolo dhintay, xubin ay ahaataba, ayaa midkayo laf ku tuuraa kabarka dukaan Baaniyaal leeyahay. Markaa ayuu cararaa. Kii lafta tuuray ku la socda, ayaa inta boorka isku qariya iska dhiga in uu aad uga xunyahay waxa dhacay. Hindigii ayaa markaa ku khasbanaada in uu midkayo gambo lacag ah siiyo si uu lafta uga fogeeyo.

Marar ay hablo Hindi  ahi ii dhiibteen bursaliid ay dubeen si aan ugu soo iibsho, badanaa lacagta aan ka gado waa ku khamaari jiray si aan u badsho oo uga sii macaasho. Haddii khamaarka la iga helo, waddada ayaan boorka faarfaaraa oo is boohiyaa ilaa qof waddada marayaa i warsado waxa iga lumay oo i siiyo qaddaadiicda aan u baahanahay. Iyadana, marka maraakiibta rakaab Yurubi ahi siddaa timaaddo, intayada carruurta ahi waa u dabaalan jirnay, iyaguna gambooyin lacag ah ayay biyaha noogu tuuri jireen. Mararka qaarkood xataa shilin ama nuskarown ayay badda ku tuuri jireen. Isla marka aannu u aragno qaddaadiicdii oo soo dhacaysa, ayaannu quusi jirnay ilaa joog dheer oo hoose annaga oo eegaynna sigsaagga ay u sii degayso ee madaxyadayada ka kor wirwirqaya. Mararka qaarkood is-garbin daran ayaa ka dhici jiray. Marka aannu soo qabannaba kor ayaan u soo bixi jirnay oo inta kor u taagno



*Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved*

rakaabkii oo mashxaradaya tusnaa. Markaa ayaannu canka gashannaa oo haddana quusnaa. Mararka qaarkood saacado ayaannu badda ku jiri jirnay. Ciyaartani waxa ay ahayd mid khatarteeda leh, badduna libaax-badeed kama marnayn. Ciidanka booliiska ruuxoodu waa naga cayrin jireen meesha, laakiin taa in xal loo helaa waa ay iska fududayd.



PASSENGERS ON A P. AND O. STEAMER WATCHING SOMALI BOYS DIVING FOR COIN

[Watching Somali boys dive for coins!]

Mar ayaa jirtay aannu maalintii laba goor u dabaalan jirnay jasiirad nus mayl xeebta u jirta oo askar Carab ahi ay bariis naga siin jireen marka ay cuntaynayaan. Maalinta dhammaadkeeda marka aan laba beesadood helo waa igu fillayd. Macnuhu waa quraacdii maalinta xigtana waa xasiliyay. Marka aan laba gambo helana qani ayaaban isu haystay.

Maalin maalmaha ka mid ahayd ayaan **Makalla** meel ka helay tobanka shilin ee dahabiga [ama half-pound]  ah. Cagaha ayaan wax ka deyay oo Cadan isku sii daayay, halkaa oo aan **Yuhuudi** sarrifle ahaa ka sarriftay. Sarrifkii ayaan horta laba go’ oo bafto ah oo aan naftayda u xirto ka gatay. Midkiiba **rubiyad** ayaan kala baxay. Afar rubina hooyaday ayaa waxaan ugu sii dhiibay nin Cadcaddo markaa ka yimid. Labadaydii go’ ee cusbaa mid isla habeenkiiba waa la iga xaday, kii kalena waxa uu ii horseeday in aan dukaan Hindi leeyahay shaqo ku-meelgaar ah kaga helo.



*Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved*

Marka gabbalku dhaco waxa aannu is daadin jirnay waddada hareeraheeda, barta ay noqoto in ay markaa nagu qabato. Koox ilaa 12 ruux ah ayaannu meel ku wada seexan jirnay. Midkeenna ma jeclaan jirin in uu safka kan ugu dambeeya noqdo, maxaa yeelay waxaa dadka reer Cadmeed ka dhaadhacsanaa in ay jiraan dad gaar ah oo habeenkii magaalada mirta si ay dad u xadaan. Waagu marka uu dillaaco  ayaannu kacnaa oo warwareegnaa si alaabo xalay luntay ama wixii kale ee aan haaban karno u raadsanno.

Habeen dayaxu ifayo, aniga oo dhinaca dhulka dhigay, saaxiibbaday oo dhammina wada gama'sanyihiin, ayaa waxaa ii muuqatay bisad madow oo lugaynaysa. Dhagax ayaan ku ganay bisaddii. Intii aanan dhabanka dhulka si fiican u dhigin ayaan ka war helay  dhagax halgaado ah oo dhinac feerta iga haleelay. Markiiba waxaa iga dhaadhacday in ay bisaddu jin ahayd oo ay dhagaxa igu soo gantay. Habeenkaa wixii ka dambeeyay bisadaha faraha ayaan ka qaaday.

Habeen kale, annaga oo dhawr ah oo sii seexanayna ayaa dhacdo fool xumi dhacday. Laba wiil oo macangagyo ahaa. ayaa maalinnimadii wada murmay. Midkood oo ilaa 12 jir ahaa ayaa isaga oo ogaa in kan ay is hayeen uu mid aan haraуn yahay damcay in uu gebigiba ka takhaluso. Kii oo hurda ayuu inta dhadhaab culayskiisa aan la yaabay awoodda uu ku qaaday la dul tegay ku hab siiyay oo madaxa askaxaha ka dhigay. Aniga oo dhibbanaha ag hurday ayaa qayladii ku kacay. Cabaad nuxuus ah ayuun baan maqlay. Gacanta ayaan ku haabtay jaalkay, mase korkiisu waa wada dhiig. Isla markiiba qaylo ayaan ku dhuftay. Markaa, ayaa kulli dambiilihii oo markiiba cararay cagta cagta loo saaray, in kasta oo la gaari waayay. Booliiskiina markuu  soo qaban waayay ayaa dambiilihii hooyadi la soo qabtay oo xabsiga la dhigay. Isla markii uu arrinkaa maqlay ayuu is keenay oo booliiska isu dhiibay si hooyadi loo soo daayo. Halkii dhiiggu muddo dheer oo dambe ayuu ka muuqan jiray. Waxa aan tusi jirnay carruurta Soomaalida ah ee magaalada ku cusub marka dhacdadaa foosha xun aan uga sheekaynaynno. Dambiilihii markii waa dambe la soo daayay ayuu Cadan ku soo noqday isaga oo wax akhrin kara waxna qori kara oo xoogaa wax soo bartay.

Waxaa timi waa aan maqlay in booliisku aruurinayo dhammaan carruurta Soomaalida ah ee aan **sukuuniyad**da [sharciga deganaashaha] haysan oo uu **Berbera** ama dekedaha kale ee Soomaaliyeed u dib ugu celin doono. Taa darteed ayaan inta Cadan halhaleel uga baxay 15 ilaa 20 mayl u lugeeyay gobolka **Laxij**. Dadkii ugu horreeyay ee aan ku arko waxa ay ahaayeen qoryagureyaal buulal uga dhisanyihiin dhir qodax leh hoostood, shaqadooda ay ku xoogsadaanna tahay in ay qoryaha wax lagu karsado u guraan suuqa Cadmeed. Aad ayay iigu dhib badnayd in aan la qabsado, maxaa yeelay markaa Carabiga kelmado aad u kooban uun ayaan ka aqiin. Hase yeeshee, waxa aan la kulmay nin ii sheegay in aanay carruuri u joogin uuna doonayo in aan ariga u raaco inta uu qoryaha gurayo. Waxa uu igu shaqaalaysiiyay in uu i siinayo cunnadayda oo ka kooban muufo haruur iyo caano ari. Intaa waxaa ii dheeraa mushaharkayga oo ahaa **bawlad** [laba caantayn] bishiiba. Dhowr bilood markii aan la joogay



*Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved*

ayaan u sheegay in aan doonayo in aan tago. Waa iga yeelay, laakiin waxa uu ii diiday in uu mushaharkii uu ii ballanqaaday i siiyo.

Sidaa ayaan beryo kaynta iska dhex meeraysanayay. Markii gaajadu iga badato inta riyaha oo meeshaa ku badnaa mid u soo gaatamo ayaan gacanta ama afka ku maali jiray, illeen wax weel ah oo aan ku listo ma haysto e. habeenkii, mararka qaarkood masjidka degmada ayaan seexan jiray. Marka aan eyda ka baqana kaynta ayaan u hurdo doonan jiray. Hase ahaatee, xoogaa markii la joogaba shaqo uun baan heli jiray.

**Subur** [Qarn as-Subur?] muddo ayaan nin geela u daajin jiray. **Dzilaadzil** [?] nin beer ku lahaa meel tuulada hal mayl u jirta ayaa ii shaqaalaystay in aan u ilaaliyo xabxab iyo bocor u baxayay. Geedo dhaadheer inta u baxo ayaan ilaalada halkaa ka qaban jiray. Shaqadayda waxaa la ii dhaafin jiray aniga oo la ii oggolaado in beertaa wax alla waxa aan doono ka cuno. Marka xilliga beerashadu dhammaado waxa aan aadi jiray **Hoodda** [Xada (Shabwah)?] oo aan xoogaa Soomali ah ugu tegi jiray laakiin aan shaqo laga helin. **Oo'alab** [Calab ?] nin ayaan saddex toddobaad la joogay oo ka caawin jiray ilaalada beertiisa iyo lisidda geela. **Xamra** nin ayaan la joogay ilaa afar bilood oo igu shaqaaleeyay in an geeliisa balka haruurka u dhigo. Waagaa ayaa ilmo u dhasheen xaafadda. Markaa ayaa, sida caadada Carbeed ahayd, timajare loo yeeray, si uu ilmaha yar u gudo. Anigana waxaa la ii soo bandhigay in aan fursaddaa ka faa'iidaysto. Wiilasha Carabta ah ayaa aad iigu caayi jiray buuryaqabnimadayda sida gaalada, waxaaba se aan joogay markaa da'da wiilasha Soomalida lagu gudi jiray. Marka aad ayaan ugu faraxsanaa in aan aqbalo fursadda la i siiyay.

Xamra waa ka tegay. Waxaan qabtay **Sufyaan** oo aan ugu tegay nin dhowaan guursaday oo ilme jirran haysta. Reerku xoogaa ari iyo lo' ah ayuu lahaa, shaqadayduna waxa ay ahayd in aan xoolaha raaco oo ka jiro in ay beeraha dadka taraaraan. Xanuun xummad daran leh ayaa waagaa igu dhacay oo iga qarqariyay. Wixii dhar la heli karay oo dhan in la igu dedo ayaan codsaday, laakiin waxba waa i tari waayeen. Habeen ayaan toosay. Waxa aan arkayna sidaan ayay u dhaceen: hooyadii reerka ayaa waxa ay siddaa dheri cunno wanaagsani ka buuxdo (muufo haruur, caano, subag). Dherigii ayay iyada oo sidda canuggii xanuunsanaa kula wareegaaleysanaysaa, iyada oo mar mar aniga igala dul tallaabsanaysa. Isla markaa, waxa ay ku tiraabaysaa ereyo ay hoos u leedahay. Cabbaar ayaan si taxaddar leh u dhawray oo gartay waxa ay uga dan leedahay. Sixir ayay maleegaysay si ay waxa xun ee jirrada ilmaha sababaya ay cunnada ay siddo ugu wareegaan. Dabadeed waxa ay doonaysaa in ay aniga cunnadaa i siiso oo wixii jirrada sabayay ay aniga iigu wareegaan canuggeeduna u bogsado. Taa waxaa dheeraa, markii ay ilmaha xanuunsan ku dul wareegaalaysanaysay dhowr mar ayay magacayga iigu yeedhay "Cali!", si ay ii toosiso oo cunnada ii siiso. Marmarsiiyo aan dibadda ugu baxo ayaan baarbaaray. Markii aan bannaanka isku hubsadayna orod ayaan isa sii daayay, dibna ugu ma soo noqon.

Waxaan u tegay nin **Busuri** ah. Waxa aan ogaaday in dadkaasi ay Carabta ka calool nugulyihiin oo ka naxariis badanyihiin. Ninkaa carruurtiisa ayaan la ciyaari jiray. Laakiin



*Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved*

dhakhso ayaa xummaddaydii u sii xumaatay ilaa aan heer xun gaaray. Reerkaasi si walba oo ay awoodeen waa iila tacaaleen intii aan xanuunsanaa, markii aan bogsadayna waxa aan bilaabay in aan shaqo doonto. Tuulooyin badan ayaan maray. Dabadeedna Cadan ayaan isaga soo noqday, halkaa oo aan noloshaydii hore ku noqday.

Sanad ka dib ayaa booliiskii gumaysiga Ingiriisku aniga iyo wiilal kale oo Soomaali ah na qabteen oo inta doon Carbeed nagu gureen **Berbera** noo tarxiileen. Naakhuudihii waxa uu nagu xiray **khan**ka hoose ee doonida ilaa aan si fiican u fogaannay, si aanay u dhicin in aannu dib ugu dabaalanno xeebta Carbeed.

Berbera waxa aan kula kulmay nin aannu isku cid ahayn oo **saranji** ka ahaa doon Carbeed yar. Aniga oo aan cidna wayddiin ayaan ku booday doontiisii, isagiina waa iska kay daayay haddii aan shaqaysanayo. Inta aan garanayn sida doon Carbeed yari u egtahay; waxa aan oran karaa xagga sare waxaa ku yaal qol yar oo cunnada lagu kariyo oo **fan**ka hore ku yaal, xagga ugu dambaysana mid kaa la'eg oo raga **baxri**da ah iyo rakaab mar mar soo raacaa ay kadkadaloobsadaan. Doonida khankeeda hoose badeeco ayaa ku rasaysan. Waxa ay leedahay **shiraac** Laatiin[1] **dakhal** aad u dheer ku taagan iyo mid kale oo yar oo dhanka dambe ka taagan. Doonidu bariis, timir, haruur iyo cunnooyin kale ayay u kala sidday degmooyinka kala duwan ee ku teedsan xeebaha Soomaaliyeed, gaar ahaa **Berbera**, **Karin** iyo **Bullaxaar**. Waxa la igu shaqaalaysiiyay derajada **Suqayar-dabbaakh**[2]**.** Cunnada ayaa waxaan u karin jiray koox baxri ah safarka labadiisa dhanba [soo socod iyo sii socod], marka ay degaanna cunnadooda ayaan doonida uga soo dejin jiray oo keeni jiray. Mar walba oo ay ii yeeraan

[1] Shiraac yar, sadex-xagal ah oo ilaa waagan dunida meelo laga adeegsado. – *Boodhari.*

[2] Derejooyinka shaqaalaha doonidu waxa ay u kala baxaan, marka hoos laga soo bilaabo: **Kibis-cun** oo ah kuray yar oo doonida shaqadeeda baranaya laakiin aan waxba loo dirsan ee iska la socda oo ku dul nool. Waxaa ka sarreeya **Suqayar Dereg** oo ah kuray xoogsaday oo qabta shaqooyinka yaryar, sida in uu biyaha soo daro iwm. Waxaa kaa ka sarreeya **Suqayar** oo ah barbaar xooggan ama dhallinyaro ah oo shaqadiisu tahay cunnada karinteeda, aqoolidda shaqaalaha iwm. Suqayar Dereggu ninkan ayuu ka hoos shaqeeyaa. Haddii suqayarka sare aanu u shaqaalaysnayn cunno karinta waxaa badanaa doonida weheliya **Dabbaakh** oo shaqdiisa guudi tahay cunno karinta. Waxa ka sii sarreeya **Baxri** (jamac iyo keli) oo ah rag xoogxooggan oo shaqada doonida xirfad fiican u leh, haba ku soo kala horreeyeen e. Shaqadoodu waa tan guud ee doonida rariddeeda, dejinteeda, shiraaca taagiddiisa iyo dawariddiisa (marka shiraaca dhan kale loo beddelayo) iwm. Waxaa ka sii sarreeya **Saranji** oo ah ninka baxrida iyo inta ka sii hosaysaba xukuma doontana hoggaamiyaha labaad ka ah. Waxaa ugu sarreeya **Naakhuude** oo ah nin waaya-aragnimo iyo aqoonta badda isku darsaday. Shaqadiisa guudi waa hagidda majaraha doonida, oddorosidda hawada iyo maayadda, jihaynta, xiddigiska iwm. Serenjiga ayaa badanaa doonta hoggaamiya marka ay furato oo majaraha la doonayo uu naakhuuduhu ku duwo. – *Boodhari.*

- Abwaan **Saciid Saalax Axmad** oo aan nasiib u yeeshay in aan waayihiisii nololeed iyo shaqo, ilaa 1991 la soo gaaro, wax ka qoro ayaan uga mahadcelinayaa in aan wax ka ogaado cilmiga badda ee Soomaalidu ku adeegato. Waa ka cududaaranayaa haddii aan sidii uu iigu sheegay u wada toosin waayo. Mar uun ayaan isku soo duwi doonaa oo wadaagi doonnaa intaa iyo in ka badan oo aan abwaanka ka bartay, eebbe idanki.



*Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved*

baxridu heegan dhaga fudud waa inaan ahaadaa, haddii aan soo dhakhsan waayana **Daraf**[3] ayaa la ila dhaci jiray.

Waa dambe ayaa doonidii **shixnad** ari ah u soo qaadday Cadan, aniguna waa ka faa'iidaystay si aan Carabiya dib ugu soo laabto.

Maadaama aanan Cadan joogi karayn, Laxij ayaan ku noqday. Xada ayaan kula kulmay nin beeraha ay dawaldda Laxij beerto ka ganacsada. Miraha[4] ka soo go'a ayuu suuqa Cadmeed u iib gayn jiray. Wuxuu shaqadaa ku qaban jiray rati yar oo 7 ilaa 8 jir ahaa oo uu lahaa. Waxa uu ii sheegay in nus-rubiyad i siinayo bishii haddii aan ratigaa oo raran nin Cadan jooga ugu geeyo. Waa aan aqbalay. Beryo ka dib, markii beertii soo go'day ayaa khudaartii mirihii lagu raray oo aan kolonyo safar ah oo Cadan u jeedda raacay. Nasiib darro, rarku ratiga aad ayuu ugu cuslaa. Intii jidka la sii socday ayuu ratigii fariistay. Wiil kale oo isna rati u rarnaa ayaa ii joogsaday si uu ii caawiyo oo ratiga iila kiciyo, si aanan safarlayda uga daba tago. Xoogaa markii aan sii soconnay ayuu ratigii haddana fariistay, dibna waa loogu kari waayay in uu hal tallaabo hore u qaado. Markaa kala barka ayaan joognay. Wax aan sameeyo ayaan garan waayay. Kobtaa saxaraha ah ayaan habeenkii oo dhan joogay. Markii aan gaajooday, maadaama aanan cunno kale wadan, mirihii awrka ku ranrnaa oo qaar wiilkii i caawiyay ka sii cunay ayaan anna in ka cunay.

Waagii ayaa beryay, wax xal ahina weli waa ii bixi waayay. Halka iigu dhoweyd ee aan miciin ka fili karay waxa ay ahayd kob xoolaha laga waraabiyo oo in yar oo dad ahi ku noolaa. Meeshii ayaan tegay oo ka dalbaday rati iyo nin wada oo rarkayga Cadan u qaada. Ninkii wuxuu iga dalbay lacag aad uga badan intii mulkiilihii aan u shaqaynayay uu dawladda kaga heli lahaa. Laakiin maxaan kale oo samaym karay in aan yeelo uun mooyee? Sidaa ayaan ku dhaqaajinnay inta ratigaygii isaga oo dabran bartii kaga tegay.

Jidka, ayaa waxaa nooga hor yimid wiil kale oo rati waday oo inta Cadan ka soo laabtay Xada u socda. Wixii dhacay ayaan uga warramay oo ka codsaday in uu qaalinkaygii ninkii lahaa u sii kaxeeyo. Ninkii aan soo kiraystay isagiina mirihii ayuu si takrifal leh uga noolaaday, markii aannu Cadan gaarnayna afar meelood oo meel ayaa maqnaatay markii ninkii la iigu soo dhiibay tiriyay. Arrintani fajac ayay igu noqotay, waxaana aan bilaabay in aan ka fikiro wixii aan la hortegi lahaa ninkii aan u shaqaynayay marka aan ku laabto. Mirihii markii la gaday lacagtii aniga la iima dhiibin e ninkii ila socday ayaa loo sii dhiibay. Dabadeed Xada ayaan soo aadnay annaga oo dambiilo faaruq ah wadanna. Ninkii ratigiisii ayuu fuulay, aniguna waa daba socday. Markii aannu gaarnay meeshii dhibku igu qabsaday ayaan u imid qaalinkaygii oo aan meeshii joogin oo malaha wiilkii aan waddada ku kullannay

[3] Ciqaab xarig faraqi lagu garaacayo eedaysanaha. – *asal* (anigu kuma darin sharraxaaddan ee qoraalkii af Ingiriisiga ku dhignaa ayay sidaa ugu qornayd).
[4] *Saytuun* iyo *Beydaan* ayaa miraha ka mid ahaa. – *asal* (anigu kuma darin sharraxaaddan ee qoraalkii af Ingiriisiga ku dhignaa ayay sidaa ugu qornayd).



*Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved*

uu ninkii lahaa u sii kaxeeyay. arintaa ayaa xil wayn iga furatay, maxaa yeelay kuma dhici karin in aan carada ninkii aan u shaqaynayay qaabbilo, intii aan u dedaalay ka bandanna uma qaban karin. Isla markiiba waxaan goostay in aan dib isu reebo. Markii aan fursad helay cagaha ayaan wax ka deyay oo inta xagga galbeed afka saaray sidaa ku libdhay.

Waxaan tegay **Waxad.** Halkaa ayaan fardo nin *sayid* ahi lahaa ku ilaalin jiray. Laakiin ninkani waxa uu ahaa nin aad uga duwan intii aan soo arkay. Mararka qaarkood waa i garaaci jiray. In kasta oo uu si fiican ii quudin jiray, waa iska la sii joogay. Laba todobaad dabadood ayaan isaga tegay.

Saddexdii bilood ee xigtay waxaan la joogay nin aad u wanaagsan. Waxa uu ahaa beeralay dhul uu isugu lahaa falan jiray, dadka kalena waa u shaqayn jiray. Hal heetisa [jiis] oo uu lahaa ayuu igu aamminay oo aan meesha ugu daaqa wacan daajin jiray. Aad ayaan ugu bogay ninkaa.

Dhowr meelood oo kale markii aan soo maray ayaan ugu dambayntii Cadan oo dadkaygii joogay ku soo laabtay. Marakan shaqo qumman ayaan helay. Shaqadaydu waxa ay u badnayd xammaali iyo iibinta miraha iyo khudaarta. Laakiin joogitaankayga meeshu ma sugnayn, maxaa yeelay warqado rukhso ah oo aan meesha ku sii joogo ma haysan.



*Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved*



[Toloow raggan ma ku jiraa?]

Habeen, annaga oo 23 carruur Soomaliya ah, ayaa waxa aannu seexannay iskool barandadi. Koox boolis ah ayaa annagii oo hurudna na hareeysay. In yar uun ayaa naga baxsatay. Saldhiggii booliiska ayaa na loo taxaabay oo nala ku sii xiray inta nala ka musaafurinayo. Xilligii **badxiran**ka ayaa markaa bilowday. Waa xilliga dabaysha maansuunka ee Koofur Galbeed timaaddo ee inta badduu aadka u kacdo aanay dooniyi ku dhicin inay ku safarto. Laba ama saddexdiiba hal qol ayaa la isku la keen xiray. Waxaa ilays noo ahaa dalool yar oo derbiga xaggiisa sare ku yiil. Daaqaddaa yar haddii aannu tafno waxa noo muuqanayay dadka jidka marmaraya, saaxiibbadayadii baxsadayna waa kala sheekaysan karnay. Mararaka qaarkood si aan waqtiga isu dhaafinno ayaannu **shax** ama **korkabood** quruurux ku ciyaari jirnay[5].

[5] Eugene Gespard Marin waxyaalihii uu Ibraahin ka bartay dabadeedna uu waa dambe wax ka qoray waxaa ka mid ahaa ciyaaraha ay Shaxdu ka mid tahay. Richard Panchurst ruuxiisu markii uu qaraalka sheekadan ogaaday waxa ay ahayd mar uu baarayay ciyaaro kuwan la mid oo Itoobiya laga ciyaaro. Sida uu sheegay, carruurnimadiisii ayuu mar guriga Marin wax ka deggenaa oo soo xusuusisay qoraalladiisii. – *Boodhari*



*Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved*

Saddex billod ayaan sidaa ku laasannay, intii la sugayay dabaysha maansuunka Waqooyi Bari. Waa xilliga **badfuran**ka ee doomaha loo fasaxo in ay badda ku safraan. Dabadeed markab ayaa nala ku guray oo xargo la is kula kaaya xiriiriyay ilaa intii aannu badda si fiican ugu durkaynnay. Dhowr beri dabadeed,[6] ayaa Laas Qoray na la ku daadshay. Halkaa markii aan tegay, intii lix sano oo ka dambaysa ahayd dalkayga ayaan joogay.

*La soco cutubka saddexaad oo ka sii xiiso badan, Rabbi idanki.*

**Afeef**: sawirrada aan u adeegsaday cutubkan kuma jirin qoraalkii asalka ahaa ee aniga ayaa ku daray. Nasiib darro cid gooni ah oo aan xaqooda u qiro ma xusuusto. Hase ahaatee, ciddii xaqooda lehba waa u qirayaa ugana mahadcelinayaa adeegsigooda.

**Tixraac**: *Halkii hore, bogagga 170-76.*

Boodhari Warsame

Email: Bodhari.warsame@gmail.com

6



*Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved*